



Baaritaana intaas ka badan, tan macneheedu waa maxay?

Waxaa dib laguugu yeeray raajo naas oo intaa ka badan. Dumarka badankood dib loogu yeeray baaritaan waxay hellaan natijjo caadi ah (mana laha kansarka naaska).

Maxaa la iigu yeeray?

Maaha wax aan caadi ahayn in laguu yeero si lagaaga qaado raajo siyaada ah. Sababaha guud waxaa ka mid ah:

Cufka

Raajada naasku waa raajada cadka naaskaaga. Cadka naaska oo aan si siman u qaybsanayn wuxuu u ekaan karaa wax aan caadi ahayn. Raajo siyaada ah ayaa laga yaabaa inay caawinto inaad aqoonsato meel degsan sida cadka qanjirka.

Burooyinka

Cuf wareega lehna geeso ayaa badanaa ah wax aan dhiblahayn (mid aan kansar ahayn) oo buro ah. Haddii geesuhu aanay waadax ahayn waxaa loo baahan yahay baaritaan siyaada ah.

Calcification

Haraadiga kaalshiyamka (calcification) ayaa ka muuqda sawirka naaska kuwaas ayaana badanaa ah caadi. Si kasta ha ahaatee, kooxa kaalshiyam asalkoodu yahay oo aan isku dubaridanayn ayaa noqon kara calaamada ugu horeeya ee kansarka waxayna u baahan yihii baaritaano.

Xoqniinka

Qaliin hore oo naaska ah ayaa laga yaabaa inuu sababay nabar. Nabarka jirka ayaa raajada ka dhiga mid ay adag tahay in la akhriyo waxaana laga yaabaa inaad u baahan tahay baaritaana siyaada ah.

Maqaar calaamadiyaha

Calaamadaha maqaarka oo ka muuqda raajada waxaa laga yaabaa in la saaro meesha xoqan ama nabarka ah, baroh ama meela calaamadaysan ee naaska ah si ay u caawinto fahamka qofka qaadaya raajada.

Sidee ku ogaanayaa natijjooyinka raajada naaska?

BreastScreen WA ayaa ku soo wici doonta si ay kuugu sheegto inaad ogaato natijjada raajada naaska. Baaritaana siyaada ah ayaa laga yaabaa in lagu taliyo iyada oo ku xiran muuqaalka baaritaanada naaska. Ku dhiiro inaad weydiiso su'aalla badan, si aad u ogaato sababta dib laguugu yeeray.

Haddii aad u baahan tahay baaritaana siyaada ah, waxaa balan lagaaga samayn doonaa BreastScreen WA ee Xarunta Qiimaynta Naaska baaritaano naaska ah ee dambe. Adeegani waa lacag la'aan dumarka magaalada ka baxsanina waxaa laga yaabaa xaq u leeyihiin Mashruuca Ka-caawinta Bukaanka Safarka (PATS). Fadlan arag Dhakhtarkaaga Guud maclummaad intaas ka badan.

Muuqaaladii hore

Fadlan hay dhamaan muuqaaladii hore mammogramka iyo baaritaanadii ultrasound-ka ee naaska oo aad heshay. Muuqaalada hore ayaa caawin kara qofka raaja yaqaanka ah si ay ugu muujiso meelaha dareenka laga qabi karo ee mammogram-ka inuu yahay mid aan welwel lahayn.

Waa baaritaanada kale ee noqon kara lagama maarmaan?

Isbedelada badankood oo mammogram-ka ayaa aad u yar in laga dareemo naaska waxayna u baahan tahay baaritaana khaasa.

Aad wax uga ogaanta mammography-ga

Tani waxay ku lug leedahay cabirknaaska taas oo ku lug leh danaynta goobta baaritaanka.

Tomosynthesis / 3D mammography ee Naaska
Sawirka naaska oo saddex dhinac ah (oo loogu yeero digital breast tomosynthesis) waxaa lagu isticmaalaa Aallad kumbuyuutar oo khaasa oo naaska iyada oo la isticmaalayo saddex xaglood. Mammogram-ka caadiga ahi wuxuu abuuraa laba muuqaal (2D) oo ah muuqaalka naaska.

Baaritaanka naaska ee dhakhtarka

Haddii aad u baahan tahay baaritaanka dhakhtarka muuqaaladaada uu baaray raajo yaqaanku; dhakhtar dumar oo naaska ah ayaa samayn doona baaris buuxda oo naaskaaga ah kaalana hadli doonta wixii ku saabsan taariikhdaada caafimaadka.

Ultrasound-ka naaska

Kani waa baaritaan isticmaalaya dhawaqa mawjadaha (maaha shucaac) si uu u muujiyo faahfaahinta naaska. Naaska waxaa lagu daboolla gel waxaana lagu riixaa maqaarka.

Cad-goynta muuqaal hagayo

Cad-goynta naaska waa meesha irbada laga geliyey naaska si loo qaado cad sambal ah ee meesha la danaynayo, sidaas darteed waxaa lagu fiirin karaa Microscope.

Raaja yaqaanku wuxuu fulinayaahabka loo isticmaalo ultrasound-ka ama tusaha x-ray-da si loo xaqijiyo in irbadu ka soo qaado sambal sax ah. Suuxin goobeed ayaa la isticmaalayaa. Cadka waxaa eegaya cudur-yaqaan natijjooyinkaasna waxaa la helli karaa 24saac ka dib.

Qabatada calaamadeeyaha

Mararka qaarkood X-rayda ka dib waxaa la qaaday cad-goyn jihaysan waana laga yaabaa inay muhiim u tahay in lagu calaamadiyo qabato goobta cad-goynta.

Kansarada dhamaantood ma lagu arki karaa baaritaanadaan?

Kansarada badankood waa la ogaan doonaa, laakiin baaritaan lama ballan qaadi karo meelaynta kansarada oo dhan. Waa muhiim inay dhamaan dumarku raacaan wixii lagu sameeyey.

Ballanta Qiimaynta

Kuwaani waa xaruma ku takhasusay xaallada badan oo kala duwan halkaas oo aad ka heli doontid qiimayn aqooniyahan iyo maaraynta kooxdayada oo ah raajo yaqaano, kalkaalisooyin, radiographers, iyo dhakhtarada naasaha iyo kuwa qaliinka.

Dhamaan ballamada waxaa loo qorsheeyaa subaxdnimada. Wuxaa u baahan tahay inaad ogolaato **ilaa 8 saacadood** qiimayn buuxda. Fadlan u ogolow shaqaalaha rugta caafimaadka inay og yihiin haddaad u baahan tahay shahaadada dhakhtarka ee cidda aad u shaqayso.

Fadlan keenso lacagta goobta gaari-dhigashada. Haddii kale, fadlan wac Transperth tel: 13 62 13 ee xalalka gaadiidka dadweynaha.

Natijjooyinka Dhakhtarkaaga Guud


Haddii aad magacawday Dhakhtar Guud (waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad sidaas samayo) Breast Screen WA ayaa lala socodsiin doonaa balamada baaritaano intaas ka badan. Dhakhtar kaaga Guud ayaa isagana lala socodsiin doonaa qiimayntaada natijjada booqashada.

BreastScreen WA

Telefoonka (08) 9323 6700 Fakis (08) 9323 6799
Email breastscreenwa@health.wa.gov.au
Adeega Tarjumida Qoraalka Iyo Afcelinta
(Translating and Interpreting Service-TIS) 13 14 50


Xarumaha Qiimaynta ee BreastScreen WA

Royal Perth Hospital (RPH) Breast Assessment Clinic
Level 3, North Block. Wellington Street, Perth, 6000




Sir Charles Gairdner Hospital


G Block, 1st floor, Hospital Avenue, Nedlands.



1 Take Gold Lift to the 1st Floor




2 Walk to BreastScreen WA




Xarumaha Qiimaynta ee BreastScreen WA


Bunbury South West Health Campus Corner of Bussell Highway and Robertson Drive



Fiona Stanley Hospital Level 1 Main Hospital, 102-118 Murdoch Drive, Murdoch Tel: (08) 6152 4125



Joondalup 57 Joondalup Drive, Joondalup



BreastScreen
AUSTRALIA
A joint Australian, State and Territory Government Program

